

Caawimaadda ilmaha ee xeeladda Mnemonics

Helping Your Child with Mnemonics—Somali version

Sharciga waxbarashada dadka naafada ah ee 2004 Individuals with Disabilities Education Act (IDEA) wxuu xoojinayaa fursadaha ardeyda naafada ah leeyihiin xagga wax barashada si ay horumar uga gaaraan manaahijta guud ee loogu tala galay ardada caadiga ah. Isla markaa, sharciga kale ee loo yaqaan ka hortagga dib u dhaca ilmaha (No Child left Behind Act) waxuu ku taqasusan yahay in la xoojiyaa natiijyada waxbarashada ardayda oo idil. Maddaama xoogga la saaray horumarka waxbarashada, gobolka waxaa ku qasban in uu imtixaan lagu eegayo horumarka ardeydu gaareyso qaado. Imtixaannadan oo lagu eego in ilmahu baasayo fasalka ama qalin jebinayo.

Ilmaha naafada leh waxaa laga doonayaa iney imtixaannada la qaataan ilmaha kale ee caadiga ah oo ey isku heerka yihiin. Haddii loo baahdo, waxaa laga yabaa in ilmaha naafada ah casharada loo waafajiyo ama loo hab dooriyo. Ilmaha qaarkood waxaa lagu sameeyaa qiimeeyn waxbarasho oo u dhigma imtixaanka ardada caadiga qaadata. Qaarkoodna waxaa laga qaadaa imtixaanno si ka duwan loo qiimeynayo.

Ilmahaaga waa in uu jawaabaha si dhaqso iyo sax ah u xasuustaa si uu ugu wanaagsanaado imtixaanka. Dabcan xassustu la ma mid aha fahamka, hase ahaatee, ilmahu waa ku dhib iney muujiyaan waxa ay garanayaan haddeysan xassusan karin. Xasuus darradan waa karti inta badan ilmaha naafada ah ay dhibaato ku qabaan. Nasiib wanaag waxaa ah, in aad ku caawini karto ilmaha hab ay ku xasuusan karaan.

Ilmahaaga xasuustooda ee waxyaabaha xaqqiqaada ah, waxey ku xiran tahay sida ey macluumaadka u baaq fashilaan iyo sida ay dib uula soo baxaan. Barashada waa habka ey ilmaha macluumaadka ugu keydiyaan xasuusta. Tani waxaa loo yaqaan baaq fashilin (encoding information). Imtixaannada waxaa ilmaha laga doonayaa iney dib u soo xasuustaan waxyaabaha ey hore u barten. Tanna waxaa loo yaqaan dib ula soo bixid. Marka aad ilmaha ka caawineyso howsha dugsiga ee guriga (home work), waxaad kaloo ka caawini kartaa habka

uu ilmaha macluumaadka u baaq fashilayo. Bedelka laga bedelayo sida ey macluumaadka u baaq fashilaan, waxey ku hogaamineysaa dib ula soo bixid wanaagsan.

Xeeladda loo yaqaan Mnemonic (Waxaa loogu dhawaaqaa nih MA nihk) waa tabab ilmaha looga caawiyo xagga maskax ku keydinta macluumaadka iyo baaq fashilidda. Dabadeed ilmahu waa ku wanaag sanaanayaa dib ula soo bixida ama dib u soo xasuusashada. Marka ilmahu sticmaalo xeeladahan, waxay awoodaan iney gartaan macluumaadka cusub oo ay baranayaan iney la mid yihiin kuwo ay horey u yiqiineen. Kuwo ay xasuusanayaan. Xiriirkaa xooggan oo ay u yeelayaan macluumaadka cusub iyo kuwii horey ay u yiqiineen, waxey u masaamaxeysaa in ilmahu xasuusnaado macluumaadka cusub muddo dheer.

Tusaalooyin ah xeeladaha Mnemonic

Habka Kelmadda Furaha ah (the keyword method) - Habkani wuxuu wada xiriirinayaa kelmadda cusub iyo kelmad fure u ah. Kelmadda furaha u ah waxey u dhawaaq egtahay kelmadda cusub (waa kelmad cusub oo aad ilmaha bareyso adigoo ku meteleya kelmad kale ee u dhawaaq eg si ay u soo xasuustaan). Sawir kelmadeed oo aad maskaxda ka sawiraneyso si aad ugu soo xasuusato kelmadda cusub. Tusaalo hadaan u soo qaadano in ilmaha laga doonayo inuu bartaa magaca ingilishka lagu yiraahdo jeerta oo ah Hippo. Si uu u soo xasuusto, waxaad ku oran kartaa magaca gabdheed ee Hibo ku soo xasuuso Hippo.

Habka kelmadda la suro (the pegword method) - Habkani waa hab lagu soo xasuusto macluumaad tiro ku socda ama si tireysan isugu xiga. Habka kelmadda la suro waa hab aad ku soo xasuusaneyso tiro adigoo ku matalaya kelmad tiradaa u dhawaaq eg. Tusaalo haddaan u soo qaadano, in ilmaha laga doonayo in uu xasuusto tirada shan iyo lixdankii. Dabadeed waxaad ku oran kartaa cayayaanka shinnida ku soo xasuuso tiradaa. Magaca shinnida waxuu



Technical Assistance ALLIANCE
for Parent Centers
8161 Normandale Blvd.
Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000
952.838.0190 TTY
952.838.0199 fax
888.248.0822 National Toll-free
alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

dhawaaqiisu ka bilaawdaa sh, shinniduna lix lugood ama laxaad ayeey leedahay. Dabadeed taa waxuu ku soo xasuusan karaa shan iyo lixaad.

Tabta xruufaha (letter strategies) – Tabtani waxaa loo isticmaala si lagu soo xasuusto waxyaabo tiro ah. Si waxyaabaha lagu xasuusto, waxaa loo sameeyey hal xaraf oo u taagan kelmad walba oo tiradaa ka mid ah. Xarafka oo ah xarafka ay kelmadu ka bilaabato. Haddaan tusaalo u soo qaadanno, kelmadda HOMES waa kelmad uu ardaygu ku soo xasuusan karo shanta war ee ugu waaweyn dalka mareykanka. (Huron, Ontario, Michigan, Erie iyo Superior).

Waxaa baaris lagu ogaaday, in arddada laxaadka l'a si wanaagsan wax ugu bartaan marka ay xeeladaha mnemonic isticmaalaan. Baarista waxaa kaloo lagu ogaaday, isticmaalka xeeladda mnemonic in ay ardada heer walba leh, natiijyo wanaagsan ka keennaan imtixaanka.

Xeeladda mnemonics ma'aha mid loo isticmaalo xaalad walba ee wax lagu barto. Waxaa jira tabab kale ee loo bartaa maaddo walba oo aad baraneyso oo aan xasuusta keliya ku taqasusneyn. Hase ahaatee, mnemonics waa hab ka tageereysa ilmaha si ay u muujiyaan waxa ay barten. Waa mid ku hogaamineysa ilmaha horumar wanaagsan xagga dugsigga.

From — Mastropieri, M.A. & Scruggs, T.E. (1998) Enhancing School Success with Mnemonic Strategies, *Intervention in School and Clinic*, 33(4), 201-208.

Full article available online at <http://www.ldonline.org/article/5912>

For more information on how to use these techniques, look for books about memory improvement or mnemonics.